


Goorma ayay Tabasho Cabasho Noqotaa?

Inta badan, wada xidhiidhka fiican, su'aalaha waalidku ka qabo waxbarashada ilmahooga waa la soo jeediyaa. Tabashooyinka iyo arrimuhu waxay aad ugu dhawyihiin inay xumaadaan marka aan laga jawaabin. Waalidku sidoo kale wuu ku khilaafi karaa sharraxaadda, go'aanka iyo/ama siyaasadda ama habka degmada.

Kala hadalka arrinta qofka qaabilsan waa muhiim. Haddii wax jawaaba ama xal ahi aanu dhicin, waalidka waxa lagula talinayaa inuu la hadlo qofkaas kormeerihiisa.

Garashada xuquuqda iyo masuuliyaduhu waxay waalidka ka caawisaa qaadista tallaabooyin habboon si ay tabashadooda u muujiyaan. Haddii cabasho ay eedaynayso jabinta beegaalka Qawaaniinta Maamuleed ee Oregon, waxa dhici karta in qofi raaco hannaanka "tallaabooyinka fayl garaynta fayl cabasho".

Siyaasadaha iyo Hababka TAG waxa laga helaa xafiisyada dugsiga, Xafiiska TAG, iyo barta internetka PPS TAG.



Tallaabooyinka Buuxinta Cabasho

1. Ku Xallinta Dhibaatooyinka Marxaladda Dugsiga

Dhibaatooyinka badankooda waxa lagu xaliyaa gudaha. Habka cabashadu waa inuu markasta ku bilaabmaa warqad cabasho oo loo diro qofka sida tooska ah ardayga uga masuulka ah (tusaale macalin iyo/ama maamule). Wada xidhiidhkan waxa lala wadaagaa Xafiiska TAG. Ku xallinta dhibaata si aan caadi ahayn ama nooc dhexdhexaad ah markasta waa xalka ugu wanaagsan.

2. Xallinta Dhibaatooyinka Marxaladda Ururka

Haddii dhibaato lagu xallin kari waayo marxaladda dugsiga, la xidhiidh Agaasimaha Ururka (kormeeraha Maamulaha) si aad ugala xaajooto xal la'aanta.

3. Xallinta Dhibaatooyinka Marxaladd Degmada

Warqad ku saabsan xal la'aanta dhibaata ee marxaladaha dugsiga iyo mandaqadda u dir Maamulka Degmada, adoo nuqulo siinaya Guddiga Waxbarashada, Agaasimaha Ururka iyo maamulaha. Ku dar qoraalada gaagaaban ee kulanno hore iyo warqaddii hore ee cabashasda.

4.

Codsi u Qoridda Maamulka Gobolka ee Tacliinta Dawladda.

Kadib ka daalista hababka cabashada deegaanka ama 45 cisho kadib laga bilaabo buuxinta cabasho qoraala ee dugsiga degmada, kii doonaa ha soo horeeyee, raac tallaabooyinka lagu muujiyey OAR 581-22-1940.

Codsiga waa in loo sheegaa Maamulka Gobolka Tacliinta Dawladda, Waaxda Waxbarashada Oregon, 255 Cabitol Street NE, Salem, OR 97310-0203. Waa inuu ku jiraa magacaaga, ciwaanka iyo dugsiga degmada; magaca iyo ciwaanka dugsiga degmada aad rumaysan tahay inuu jabiyay qiyaasta; bayaan kooban oo caddaynaya qiyaasta gobolka iyo sharaxaadaada jabinta.

Maamulka Gobolku waxay ogaysiin dugsiga degmada codsiga waxayna siin degmada 30 cisho si ay u fayl garaystaan warbixin qoraala jawaab ahaan. Kadib helista warbixinta degmada, Maamulka sare waxay go'aansan inay aqbalaan ama diidaan codsiga. Haddii codsiga la aqbalo, Maamulka Gobolku waxay leeyihiin dhawr fursadood, kuwaasoo lagu faahfaahiyay OARs, laga helo barta internetka iyo buug-gacmeedka waalidka TAG.

Kuwa cabanaya waxa lagu boorinayaa inay ilaaliyaan diiwaankooda la xidhiidh wada hadalka iyo kulannada.



Habka Codsiga ee Go'aanka Aqoonsiga

Haddii go'aanka aqoonsigu yahay *Maya* ama *ay suurogal tahay*, waalidku wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan ka qaato go'aanka isagoo ku ogaysiinaya maamulaha qoraal inay shaqaalaha Xafiiska TAG dib u qiimeeyaan go'aanada Kooxda Hogaanka TAG ee dugsigaaga.

Maamuluhu wuxuu ku ogaysiin Xafiiska TAG 10 cisho gudahood helidda warqadda waalidka.

Xafiiska TAG wuxuu kala xidhiidhi waalidka macluumaad dheeraada.

Faylka shaqaynaya ee ardayga iyo macluumaadka waalidku bixiyay ayaa dib loo eegi.

Xafiiska TAG waxa dhici karta inay maamulaan baadhitaano dheeraada, codsadaan muunado shaqo la qiimeeyay oo dheeraada, iyo/ama ku eego ilmaha fasalka.

Kadib dib-u-eegista kiiska, go'aan ayaa lagu gaadhsiin waalidka iyo maamulaha toban cisho gudahood.

Kadib hannaanka magacaabista TAG, Xafiiska TAG wuxuu ku ogaysiin go'aanka ugu dambeeya dugsiga iyo waalidka warqad.



Hannaanka Aqoonsiga TAG

Iyadoo la eegayo OAR 581-022-1310, Aqoonsiga Ardayda Tacliin ahaan Garaad iyo Karti Hibada loo Siiyay, ardayda waxa dhici karta in loo aqoosato in Garaad Hibo loo Siiyay iyo/ama Tacliinta ku Karti badan yihiin hadday helaan ama ka sareeyaan 97^{aad} marka boqol meelood loo qaybiyo tijaabada qaranka ee caadiga ah. Ardayda muujisa awoodday ku gaadhayaan 97^{aad} marka boqol meelood loo qaybiyo buuxiyana qiyaasaha badan ee aqoonsiga waxa dhici karta in loo aqoonsado Awoodda TAG waxaanu heli Adeegyada TAG.

Kooxda Hoggaanka TAG ee dugsiga (maamulaha, Isu-duwaha TAG, iyo wakiilada macalinka fasalka) waxay dib-u-eegaan qiyaasaha badan ee aqoonsiga: magacaabidda iyo u doodidda macalinka, waalidka, ama isaga; muunado shaqo oo la qiimeeyay; dhibcaha tijaabada caadiga ah ee qaranka.

Kooxda Hoggaanka TAG waxay ku talinaysaa *Haa, Maya*, ama suurogalnimada TAG. Xafiiska TAG ee degmadu ayaa dib-u-eega oo sameeya go'aanka kama dambaysa. Waalidka iyo dugsiga waxa lagu ogaysiinayaa go'aankan warqad.

Waxa laga soo qaatay tilmaamaha dugsiyada hoose-sare ee Oregon, Waaxda Tacliinta Oregon. 1980, bogga 24 iyo Buug-gacmeedka waalidka Oregon ee Carruurta Kartida Hibo loo siiyay, 1990.

**Dugsiyada Dawlada Portland
Xafiiska TAG
501 North Dixon St.
Portland OR 97227
503.916.3358**

Dugsiyada Dawladda
Portland

**Karti & Hibo ku
leh Tacliinta**



**CODSIYADA
IYO
CABASHOYINKA**

Waxa dib loo eegay
Juunyo 2008

Bayaanka Sinaanta ee Dugsiyada Dawladda Portland
Dugsiyada Dawladda Portland waxay aqoonsan yihiin kala duwanaanshaha iyo qiimaha dadka iyo kooxaha oo dhan iyo doorkooda bulshada. Dadka iyo kooxaha oo dhan waa in loola dhaqmaa si isku mida hawlaha, barnaamijyada iyo hawl-socodsiiinta oo dhan, iyadoon la fiirinayn da'da, midabka, caqiidada, naafanimada, xaaladda guurka, waddanka uu ka soo jeedo, qoomiyadda, diinta, jinsiga, ama jinsigu uu u galmooda.
Siyaasadda Guddiga Tacliinta 1.80.20-P